



Fadlan Naga Caawiya Inaad Ka Soo Jawaabtaan Diiwaangalinta Tallaalada COVID-19 ee Caruurtiina iyo Qorsheynta.

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Maadaam in badan oo ka mid ah ardaydu ay qaateen tallaalka COVID-19, waxaan idinka codsaneynaa inaad nala wadaagtaan macluumaad naga caawinaya sidii aan go'aanada ku saabsan caruurta qaada cudurkan faafaya iyo sida ay isku kaarintimeynayaan, iyo waliba sidii aad u sameyn lahayn qorshayaal la isla ogyahay mustaqbalka.

Haddii ilamahaagu qaatay labadii tallaalka ee COVID-19 oo aad u tixgalineyso inuu tallaalkii loo baahnaa si buuxda u qaatay, fadlan waxaad macluumaadkaasi galisaa [ParentVUE](#), halkaasi oo ah meesha aan xogta qoysaska ku kaydino.

Bishii Sebtembar, waxaan qaadnay sahan aad idinku weydiineyno haddii ardaygaagu qaatay tallaalkii COVID-19. Ilaa hadda, tallaalka caruurta da'doodu u dhaxayso 5 ilaa 11 sanno ayaa la ansixiyey. Waxaan jecelnahay inaan ururino xog dhammeystiran oo ah intee ardaydayada ka mid ah ayaa tallaalka qaatay. Macluumaadkaasi wuxuu naga caawin doonaa go'aanada ku saabsan sida aan hawlahayaga aan u qabanayno inta ka dhiman sanad-dugsiyeedka iyo wixii ka dambeeya.

Ogaanshaha ardayda tallaalani waxay sidoo kale naga caawin doontaa inaan si degdeg ah u aqoonsano qofka u baahan in si degdeg ah loo kaartinteeyo (iskaliyeeyo) ka dib markii la ogaaday inuu xiriir dhow la sameeyey qof qaba cudurkani faafaya. Ardayda dhammaan labadii tallaalka qaatay uma baahna inay iskaliyeeyaan ka dib markii ay xiriir dhow la sameeyey qof qaba xanuunka ilaa iyo inta ayna ka muuqan wax calaamadaha lagu garto xanuunka ahi.

Fadlan waxaad ogaataa haddii ilmahaagu ka qaatay tallaalka munaasabadihii dhismayaasha PPS lagu qaatay ee lagu dugsiyadu degmadu ay ku bixinayeen, markaasi macluumaadkaasi si toosa uma tagayo ParentVUE. Haddii ardaygaagu tallaalka ka qaatay mid ka mid ah munaasabadahaasi, fadlan waxaad qaadataa dhowr daqiiqo oo aad ku cusbooneysiineyso xaalada tallaalka ee ilmahaaga aad ku sheegeyso inta tallaalka ee uu qaatay.

Adiga oo cusbooneysiya xaalada tallaalka COVID-19 ee caruurtaada, waxaad u baahan tahay kaadhkooda tallaalka ee caddeynaya inay tallaalan yihiin. Waxaad kaadhka tallaalka sawirkiisa galin kartaa ParentVUE adiga oo raacaya [tilmaamahani aadka u fudud](#). Waxaad sidoo kale u qaadi kartaa, ama ardaygaagu u qaadi karaa caddeynta kaadhka tallaalka xafiiska dugsiigaaga.

Mahadsanid!